## CODSI KU SAABSAN KA QAYBGALKA MASHRUUC CILMI BAARIS

# *UMULISTAADII – DAREENKAAGII IYO KHIBRADAHA*

Tani waa waydiin adiga kugu socota oo ku saabsan ka qaybqaadashada mashruuc cilmi baaris/baadhis uu fulinayo cusbitaalka St. Olavs. Mashruuca waxaa la weydiinayaa haweenka siday u arkaan daryeelka caafimaad ee ay heleen xiligii ay ummulayeen. Waxaanu sidoo kale rabnaa in aanu baarno/baadhno waxyaabaha saameynta ku leh dareenkooda daryeelka caafimaad.

Kaqaybgalka mashruucu waa ikhtiyaari/doorasho. Kahor intaadan go'aansan inaad kaqeybqaadato, waxaan dooneynaa inaan kugu wargalinno waxa kaqeybgalku adiga kuugu fadhiyo. Fadlan waqti sii aad ku akhriso qoraalka soo socda si taxaddar leh ka hor intaadan go'aansan. Nala soo xiriir/xidhiidh haddii ay jiraan wax aanad fahmin ama haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah.

## WAA MAXAY ULAJEEDKA CILMIBAARISTU/BAADHISTU?

Ujeeddada mashruucu waa in la kordhiyo aqoonta wada shaqeyneed ee ka dhexeysa xirfadlayaasha caafimaadka iyo bukaanka waqtiga dhalmada. Waxaanu baari/baadhi doonaa waxyaabaha saameynta ku leh ku qanacsanaanta haweenka xaalada dhalmada iyo daryeelka caafimaad ee umusha annagoo fiirinayna kala duwanaanshaha sida da'da, jinsiyadaha ama rajooyinka shaqsiga.

Dhamaan dumarka ogolaada inay kaqeybgalaan waxaa laga codsanayaa inay ka jawaabaan su’aalo. Foomka xogwaraysiga wuxuu ka koobnaan doonaa su’aalo ku saabsan kulanka aad la yeelatay qaybta dhalmada markii aad timid isbitaalka St. Olavs, sidaad u aragtid umulistaadii, waxyaabahaad filaysay xiligii umulista, dhalmooyinkii hore, khibrado hore oo noloshaada, welwel iyo xasilooni la’aan, iyo macluumaad gaar ah oo adiga kugu saabsan, tusaale ahaan luuqadaada iyo cidda aad la nooshahay. Baadhitaanku wuxuu qaataa qiyaastii 30 daqiiqo in la dhammaystiro, laakiin intii wakhti aad u baahan tahay ayaad ku isticmaali kartaa. Waxaan rabnaa in la dhamaystiro ugu danbayn maalmo kooban kadib dhalmada. Haddii aad doorato inaad kaqeybqaadato ama aadan kaqaybqaadan kuma yeelanayso wax saameyn ah adeegaaga caafimaadka.

Marka laga gudbo macluumaadka aad kaga jawaabtay su’aalihii barnaamijka, waxaanu kaa codsanaynaa oggolaanshahaaga si aan uhelno macluumaad adiga kugu saabsan sida, dhalashada , iyo ilmaha hadda dhashay iyo macluumaadka kaa diiwaan gashan (sida isticmaalka xanuun dhime/ kaar jabiye iyo miisaanka ilmaha).

## FAA’IIDOOYINKA IYO KHASAARAHA JIRI KARA

Baadhitaanka waxaa ku jira su'aalo aad dareemi karto inay xasaasi yihiin. Ka-qaybgale ahaan uma baahnid inaad ka jawaabto su'aalaha aad u aragto inay shakhsiyan yihiin. Haddii su’aalaha qayb ka mid ahi ay xaalad kugu kiciyaan ka qaybgale ahaan, shaqaalaha isbitaalka qaybta dhalmada ayaa kuu diyaar ah. La xiriir dhakhtarsare Elisabeth Magnussen (tel: 92205929).

Mashruucani wax faa’iido ah kuuma laha adiga ka-qeybgale ahaan, laakiin waxaan rajeyneynaa in daraasaddan ay gacan ka geysan doonto hagaajinta adeegyada caafimaadka ee dhammaan dumarka ku ummula Noorweey.

## KAQAYBQAADASHO XOR AH IYO FURSAD DIB ULA NOQOSHO OGOLAANSHA

Kaqaybgalka mashruucu waa ikhtiyaari. Hadaad jeceshahay inaad kaqeybqaadato, saxeex bayaanka oggolaanshaha bogga ugu dambeeya. Waad la noqon kartaa ogolaanshahaaga waqti kasta adigoon bixin wax sabab ah. Tani kuma yeelan doonto wax cawaaqib ah daaweyntaada sii socota.

Haddii aad ka noqotid ka-qaybgalka mashruucan, waxaad dalbankartaa in la tirtiro macluumaadka la soo ururiyey, haddii aan macluumaadkaasi horey loogu soo darin falanqaynta ama loo adeegsan daabacaadaha cilmiyeed. Haddii aad doonaysid inaad ka noqoto ama aad su'aalo ka qabtid mashruuca, waxaad la xiriiri kartaa Maareeyaha Mashruuca Jennifer Infanti (tel: 94721964).

## MAXAA LAGU ISTICMAALAYAA XOGAHA ANIGA IGU SAABSAN?

Macluumaadka kugu saabsan ee la diiwaangeliyay waxaa loo adeegsanayaa oo kaliya sida ku xusan ujeeddada mashruuca. Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato macluumaadka kaa diiwaangashan adiga iyo inaad saxdo wixii khaladaad ah ee ku jira macluumaadka diiwaangashan. Waxaad kaloo xaq u leedahay inaad ogaato tallaabooyinka amniga ee maaraynta xogaha.

Macluumaadka oo dhan waxaa lagu falanqayndoonaa iyadoon la aqoonsan karin magaca iyo taariikhda dhalashada qofka ama macluumaad kale oo qof lagu aqoonsan karo. Lambar qarsoon ayaa kugu xiraya macluumaadkaaga iyada oo loo marayo liistada magacyada. Maamulaha mashruuca Jennifer Infanti, arday cilmi baarista Kristin Reppen, iyo umulisada daraasadan oo kaliya ayaa arki kara liiska magacyada.

Waxaa suurogal ah in xogaha daraasadda dib loogu isticmaali doono marxaladdo dambe si loo sii falanqeeyo. Tani waxay khusaysaa oo keliya macluumaadka qarsoon ee aan ka koobnaan doonin macluumaad adiga lagugu aqoonsankaro.

Macluumaadka adiga kugu saabsani waxa laga dhigayaa kuwo aan la aqoonsan karin waxaana la tirtiri doonaa ugu danbayn 5 sano marka mashruucu dhammaado.

## CAYMIS

Kaqaybgalida daraasadan ma xanbaarsana wax khatar dhaaweceed ah inta la ogyahay, laakiin hadii wax uun dhacaan waxaa daboolaya sharciga waxyeelooyinka bukaanka.

## DARAASAD LA SOCODKA

Daraasaddan ka sokow waxaan rabnaa inaan wax ka baranno khibradaha dhalmo ee haweenka. Haddii aad doonaysid inaad ka qeybgasho wareysi lala yeelanayo mid ka mid ah cilmi-baarayaasheena xiliyada soosocda, fadlan calaamadee  sanduuqa ku yaal bogga ugu dambeeya si aan kuula soo xiriiri karno. Waxaanu kuu sharixi doonaa faahfaahinta daraasaddan markii aan kula soo xiriirno. Marka macluumaadka la bixiyo kadib waxaad xor u tahay inaad doorato inaad kaqeybqaadato iyo in aanad kaqaybqaadan mashruuca.

## OGGOLAANSHAHA

Gudiga gobolka ee anshaxa cilmi baarista caafimaadka iyo daawaynta ayaa qiimeeyey mashruucan oo siiyay ogolaansho hore (31332/2020 REK midt).

Kadib sharciga cusub ee xogaha shakhsiyeed waxaa mas'uulka xogta NTNU iyo maamulaha mashruuca Jennifer Infanti leeyihiin mas'uuliyad madaxbanaan si ay u hubiyaan in maaraynta macluumaadkaaga ay ku saleysan tahay sharciga. Mashruuca waxaa aasaas sharciyeed u ah qodobka 6-aad iyo qodobka 9-aad nr. 2 ee nidaamka ilaalinta xogta shaqsiyeed ee midowga Yurub iyo ogolaanshahaaga.

Waxaad xaq u leedahay inaad ka cabato maaraynta macluumaadkaaga adigoo cabashadaa u diraya waaxda lasocodka xogta (Datatilsynet).

## MACLUUMAADKA XIRIIRKA

Hadii aad wax su'aal ah ka qabtid mashruuca, fadlan la xiriir maareeyaha mashruuca Jennifer Infanti (tlf: 94721964, e-post: jennifer.infanti@ntnu.no) ama dhakhtarsare ee qaybta dhalmada Elisabeth Magnussen (tlf: 92205929, e-post: Elisabeth.Balstad.Magnussen@stolav.no).

Waaxda ilaalinta macluumaadka shaqsiyeed ee hayadu waa Sevian Stenvig (e-post: personvernombudet@stolav.no).

## CADAYNTA OGOLAANSHO

### WAXAAN DOONAYAA INAAN KA QAYBQAATO CILMIBAARISTAN.

---

| | |
|---|---|
| *Goobta iyo taariikhda* | *Saxeexa ka qaybqaataha* |
| | *Magaca kaqaybqaataha oo far waawayn ah* |

Waxaan ogolahay in uu ilasoo xidhiidhi karo cilmi-baare si aan uga qaybqaato waraysi daraaseedka ku saleysan khibradeyda umuleed. Waxaan fahamsanahay inaan dooran karo inaan kaqeybgalin daraasaddan wareysiga.

Iskutalaab saar: ☐

*Signeres av forsker/ansatt:*

*Jeg bekrefter å ha gitt informasjon om prosjektet.*

---

| | |
|---|---|
| *Sted og dato* | *Signatur* |
| | *Rolle i prosjektet* |